



Redd Barna

Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin bay'ad dugsi ammaan ah oo fiican

**NORWAY
WAXAY LEEDAHAY
SHARCI U GAAR AH
ARDAYDA DHIGATA
DUGSIYADA.**

SHARCIGANNA WAXA KU YAALA:

- § Waxaad xaq u leedahay inaad fiicantahay, nabadgelyona ku dareentid dugsigga iyo fasalkaagaba.
- § Waxaad xaq u leedahay inaad sheegto waxaad dareemayso, laguna dhagaysto. Markaad u sheegto qof weyn inaad adigu ama qof aad saaxiib tihiin dhibaato idinka haysato dugsigga, wuxuu dugsiggu mas'uul ka yahay in adiga iyo qofka aad saaxiibka tihiinba aad dib u heshaan wanaag!
- § Waxay dhammaan dadka waaweyn ee dugsigga jooga, ardayda ka caawinaya inay si fiican u wada dhaqmaan. Waxa ay si cad u sheegayaan inaanay sax ahayn in qof kale la dhibo ama loo xoog sheegto.



HADDII AAD DUGSIGGA XUMAAN KU DAREEMAYSO

- Haddii aanad dugsigga wanaag ku dareemayn.
- Waxaad dugsigga ku dareemaysaa kelinimo amaba in lagu takoorayo, fasalkana kuma dareemaysid nabadgelyo.
- Waxaa ku kadeeday oo ku dhibay mid ka mid ah ama qaar ka mid ah ardayda ama qof weyn oo dugsigga jooga.

MAXAAD SAMAYN KARTAA HADDA?

- U sheeg sida aad dareemayso waalidkaa ama qof kale oo weyn oo aad ku kalsoon tahay. Weydiiso caawimaad cidkale si aad ugu sheegto macallinkaaga iyo maamulaha.
- Dugsiggu wuxuu samaynayaa qorshe ku saabsan waxa dugsiggu sameyn doono si aad wanaag u dareento mar labaad!
- Haddii qorshahaasi caawinaad keeni waayo, waxaad cabasho u diri kartaan Gudoomiyaha Gobolka. Kaasi waa qofka ilaalinaaya in dugsiyada gobolka ku yaala ay racaan shuruucda iyo qawaaniinta.

WAXAAD DAREEMAYSAA INAADAN AAD U FIICNAN

- Waxaad bilaabaysaa inaad dareento inaad dugsigga qayb ka ahayn.
- Waxad bilaabaysaa inaad dareento in aadan nabadgelyo buuxda ku haysan fasalkaaga.
- Waxaa bilaabaysa in ardayda kale ku dhibaan oo aad noqon weydo qofkaad ahayd markii hore.

MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDA?

- U sheeg qof weyn oo aad ku kalsoontahay, waxa aad dareemayso! Sida tusaale ahaan qof macalin ah, kalkaalayaha caafimaadka, maamulaha amaba waalidkaaga.
- Dadka waaweyni waxay ka caawinayaan in xaalkaagu fiicnaado, nabadgelyona aad dib fasalka gudihiisa ugu dareentid.
- Haddii ay ku soo martay in lagu dhibaateeyo amaba xanuun aad kala kulantay internadka ama moobeelka, waxaa muhiim ah inaad u sheegto dadka waaweyn si lagu caawiyo.

INAAD FIICANTAHAY!

- Inaad saaxiibo haysato.
- Inaad haysato cid aad la hadli kartid, kuna kalsoontahay.
- In aad samayso waxay naftaadu dareemayso, nabadgelyona aad ku dareemayso dugsigga iyo fasalkaaga.

MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDA?

- Ka qayb geli ardayda kale ciyaarta, hubina inay dhamaantood fiican yihiin!
- Dheh jooji dhibka una usheeg qof weyn hadii aad aragto arday aanu xaalkiisu fiicnayn.

Sameflaha ayaa ku siinaya tixraac aad raaci karto si xaalkaaga dugsi u fiicnaado.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan xaqaaga ah inaad hesho bay'ad dugsi wanaagsan oo ammaan ah, ka akhri reddbarna.no/skolemijo

Ma ogtahay inaad leedahay qof wakiil ah arimaha dhibabka oo aad la xidhiidhi karto, kaas oo ku caawin kara?

Macluumaadka meesha aad kala xidhiidhayso qofkaas wakiilka ka ah arimaha dhibabka waxaad ka heli kartaa elevombudene.no